# Su'aalo ku Saabsan Kirada

Questions About Renting

## Ka waran hadii qolada guriga ay guriga hagaajin waydo?

Ka xareyso dacwo ah rahmid kiro maxkamad. Waxaa jira 2 qaab oo arritan loo bilaabi karo.

- Wac xafiiska fatashaada guryaha ee deegaankaaga ka diba waydii inay gurigaaga fatashaan. Waxay amri karaan in qolada guryahu ay guriga hagaajiso. Hadii hagaajinta aan lagu sameyn waqtiga uu amro in lagu sameeyo fatashaha gurigu, waxa aad xareysan kartaa dacwo kiro rahmid ah. **AMA**

- U dir warqad qolada guriga ay ku qoran yihiin dhamaan dhibaatooyinka. Ku qor taariikhda nuqulna kala har. Hadii aan guriga lagu hagaajin 14-cisho gudahood waxa aad xareysan kartaa dacwo kiro rahmid ah.



Dacwada kiro rahmida ah, waxa aad u dhiibaysaa kirada maxkamada intii aad siin lahayd qolada guriga. Tani waa ay ka aaminsan tahay kana fiican tahay inaad adigu kirada hayso.

Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan*.

## Adigu Guriga ma hagaajin karaa ka dib ka goyn karaa kirada kharashka

Maya – aan ka ahayn inaad haysato amar maxkamadeed oo kuu ogolaanaya adiga "hagaajin iyo ka jarid" Waxaa wacan inaad xareysato dacwad kiro rahmid ah. Hadii aad u baahan tahay hagajin degdeg ah, sida guriga oo kuleyl ama biyo aan lahayn, wac qolada guriga markiiba, waydiina hagaajinta. U sheeg qolada guriga inaad ka codsan doonto maxkamad gargaar degdeg ah hadii aysan wax ka qaban dhibaatada. Hadii qolada gurigu aysan ku hagaajin waxyaabahaa degdega ugu baahan in la hagaajiyo 24-saac gudahood, waxa aad xareysan kartaa Falka Degdega ah ee Maciinada Kiraystaha (ETRA). Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah*.

## Ma u isticmaali karaa lacagta dabaajiga ah kirada bishii la soo dhaafay?

Maya. Waa khasab inaad bixiso kirada. Hadii kale, qolada guriga waa kaa saari kartaa guriga. Sidoo kalena waxay kaa dacawaeyn kartaa Maxkamada Qaamaha Yaryar. Eeg warqadayada xogta aruursan ee ee *Lacagta Keydka Ee Kirada*.

## Qolada guriga aan uga jiraa ma soo geli karaan gurigayga?

Haa, kaliya "ujeedooyin hawleed oo macquul ah" ama hadii xaalad degdeg ahi ay jirto. Mulkiilaha gurigu inta badan waxaa uu u baahan yahay inuu ku siiyo 24-saac oo ogaysiis ah ka hor u soo gelida gurigaaga sabab hawleed. Sababaha hawleed waxa ay noqon karaan in la hagaajinayo ama la bedelo wax. Mulkiilaha guriga khasab kuma aha inuu ku siiyo ogaysiis uu ku soo galo guriga hadii uu is yiraa waxbaa ku gaaray adiga, haddii uu is yiraa waxa aad u isticmaalaysaa siyaabo sharci-darro ah.

Sharci ma aha In liiska heshiiska gurigu uu yiraa wax ku saabsan ka tanaasulida xaquuqdaada ah inaad ka hesho ogaysiis qolada guriga hadii ay doonayaan inay soo galaan gurigaaga. Hadii liiska heshiisku uu yiraa wax arrintaa ku saabsan, ma aha wax la fulin karo.

Wixii akhbaar ah ee kale ka eeg warqadayada xogta aruursan ee *Qolada Guriga aan uga jiraa ma soo geli kartaa Gurigayga?*

## Guriga ma la iga saari karaa xilliga qaboobaha?

Haa. Markii la rabo ayaa guriga la gaa saari karaa, aan ka ahayn in liiska heshiiska gurigu uu wax kale sheegayo oo taa ka duwan.

## Hadii dacwo guri ka saarid ah la iigaga adkaado, muddo intee le'eg ayaan haystaa ka hor inta aanan guurin?

Hadii adiga iyo qolada gurigu aydnaan isku raacin muddo ka dheer, maxkamadu kuma siin karo muddo ka badan 7-cisho oo aad ku guurto. Hadii aadan guriga ka bixin, qolada gurigu waxa ay ka codsan kartaa shariifka inuu ka caawiyo guriga ka saaridaada. Shariifku waxa uu kuugu keeni gurigaaga "amarka dib u soo ceshiga" kolkaa ka dibna waxa aad haystaa uun 24-saac oo aad guriga uga guurto.

Amarka waxaa lagu siin adiga KA DIB kolka dacwada maxkamada lagaaga adkaado. Warqadani aad ayey uga duwan tahay mida maxkamad uga yeerida iyo ashtakooyinka guri ka saarida ah. Shariifku amarka inuu gacanta kaaga keeno khasab kuma ah. Waxa ay dhigaan uun meel aad ka arki kartid, sida albaabkaaga hore oo kale. badanaa waxaa jira waqti ku qoran warqada amarka. Taasi waa waqtiga meesha looga tagay warqada.

Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Guri ka Saarida*.




## Guri ma la iiga saari karaa wax qof booqde ahi uu sameeyey?

Haa. badanaa, waxa aad mas'uul ka tahay waxyaabaha ilmahaaga, iyo martidaadu ay sameyso, Laakiin, waxaa jira waxyaabo badan oo ka reeban xeerarka guud. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta in sharcigu ku ilaaliyo hadii booqdahu uu yahay tacadiye falalkiisuna ay la xiriiraan tacadi uu adiga ku gaysanayey. Waxaa dhici kara iyana inay ku ilaalinayaan sharciyo loogu talagalay ilaalinta dadka naafada ah. Wac xafiiska Gargaarka Sharciga (Legal Aid) hadii aad qabto su'aalo.

## Qof aan saaxiibnahay ama aan qaraabo nahay ma ila soo degi karaa aniga?

Waxaa dhici karta inaad haysato heshiis liis qoran oo oranaya cidna kulama soo dagi karto la'aanta ogolaanshaha qolada guriga. Si taxadar leh u akhri liiska heshiiska ama kala hadal arrintan qareen Gargaarka Sharciyada (Legal Aid) ka tirsan. Haddii liiskaagu uusan saa oran ama hadii aadan haysan heshiis liis oo qoran, waxaa dhici karta inaadan u baahnayn ogolaansho. Laakiin, mar walba waa caqli inaad hesho ogolaansho hadii aad awoodo. Isku day inaad hesho ogolaanshaha isagoo qoraal ah. Xataa emayl ama dhambaal (text) waa ku filan tahay, laakiin hubi inaad meel amaan ah aad ku xafidato.



Hadii aadan ogolaansho helin qolada guriguna aysan ku faraxsanayn inaad qof kale soo dejisay guriga, qolada gurigu waxaa dhici karta inay ku siiso ogaysiis ah inaad guurto. Hadii ay taasi dhacdo wac Gargaarka Sharciyada (Legal Aid) markiiba, waxaad yeelan kartaa wali xaquuq ah inaad gurigaaga ku sii noolaato.

## Ka waran hadii qof guriga aan wadaagnaa diido ama uusan bixin kirada qaybtiisa?

Haddii qof kasta oo guriga degani uu la leeyahay heshiis liis oo u gaar ah qolada guriga leh, kolkaa qof walbaa waxa uu mas'uulka yahay inuu siiyo kirada qolada guriga. Laakiin hadii uu jiro hal liis, kirayste walbaa waa ka mas'uul bixinta dhamaan kirada oo dhan. Kolkaa, haddii qof guriga kula degani uusan bixin kirada, qoladda gurigu qof walba waa ay ka saari kartaa guriga. Aan ka ahayn in kiraystayaasha kale ay bixiyaan qaybta aan la bixin. Isku day inaad ka hesho in qolada gurigu ay ansaxiso qofka cusub ee guriga soo dega marka qof baxo, ama haddii qof uu bixin waayo qaybtiisa.

## Ma haysto liis heshiis. Qoladu gurigu ma I siin kartaa ogaysiis ah inaan ka guuro?

Haa. Laakiin waa inay raacaan xeerarka. Tusaale ahaan, kuguma oran karaan waa inaad markiiba baxdaa. Hadii aad kiro bixiso bil walba, qoladu gurigu waxa ay ku siin kartaa ogaysiis qoran oo ku waysiinaya inaad guriga ka baxdo aakhirka bisha soo socota. Taa macnaheedu waa hadii qolada gurigu ay ogaysiis ku siiso bisha Juun, waxa aad haysataa ilaa iyo bisha Luulyo 31, keeda si aad u guurto. Hadii aadan kirada bixin sababta oo ah waxa aad ku jirtaa waa xaalad qoys ama qof aad wada nooshihiin oo xiriir idinka ka dhaxeeyo, kolkaa qolada gurigu waxa ay u baahan tahay inay ku siiso ogaysiis 3 bilood ah. Khasab kuma aha inay sababta kuu sheegaan.

Qolada gurigu kuma takoori karto adiga kumana waydiin karto inaad guurto si ay kaaga aarsadaan asktakadii aad ka ashtakootay hagaajin la'aanta (aarsi). Eeg warqada xogta aruursan ee *Ogaysiiska Banaynta Guriga iyo Joojinta Liiska*.

## Hore ma uga bixi karaa heshiiskayga liiska sababta oo ah dagaal qoyska dhexdiisa ah, khashkhashaad ama dambi faraxumeyn ah?

Haa, hadii la siiyo ogaysiis qoran oo quman qolada guriga. Waa khasab inaad kirada oo buuxda aad bixiso bisha aad baxayso, aadna hubiso inaad siiso qolada guriga qoraal khaas ah oo cadeynaya inaad tahay dhibane. Eeg warqada xogta aruursan ee *Dhibanayaasha Dagaal Qoyska Dhex Mara, Qashqashaadda, ama Fal Dambiyeedka La Xiriira Galmoodka: Xaqa Aad U Leedahay In Aad Ka Baxdo Heshiiska Kirada*.

## Ka waran hadii qolada guriga aan uga jiro guriga lagala wareegayo? Ma khasabaa inaan guuro ka hor xaraashka shariifka?

Maya. Hadii qolada guriga aad uga jirtaa guriga lagala wareegayo, labadiina adiga iyo qoladu gurigu waxa aad u baahan tihiin inaad sii wadaan inaad u hogaansanaataan heshiiska liiska ilaa iyo inta ay ka dhamaanayso mudada soo ceshiga gurigu. Taasi badanaa waa 6 bilood ka dib xaraashka shariifka. Bangiga la wareegaya gurigu waa khasab inuu ku siiyo ogaysiis qoran ka hor inta aadan guurin ka dib aakhirka mudadda soo ceshiga. Waxaa dhici karta inaad leedahay xaquuq kale maadaama aad tahay kireyste gurigii uu ku jiray laga wareegayo, eeg warqada xogta aruursan ee *Kolka Qolada Guriga Aad uga Jirto lagala Wareego Guriga: La Wareegida Guriga iyo Joojinta Qandaraaska Guri kala Gadashada*.




***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**